QORAAL MAGUURTO L. 28/1977

KALA GADASHO CAD DHUL AH OO UJEEDDADIISU TAHAY DHISMO

JAMHUURIYADDA DIIMUQRAADIGA SOOMALIYA

-Maanta oo ah 30- Janaayo 1977, Wakaaladda Dhismaha Soo-maaliyeed, ee Saldhiggeedu yahay Muqdisho, Waddada la yiraahdo (Corso 1º Luglio), laguna Dhisay (Istituto); sharciga Lr.8 oo soo baxay 31Juunyo 1968, laona dhisay inay hormariso dhismaha Soomaliyeed, Guryaha Dadweyna-ha (Quartiere Case Popolare), kuna hormariso qeymo yar, oo haddana Wasaaradda Maaliyaddu ay siisay Khasnadna uga dhigtay dhulka ku yaal, Muqdisho Xaafadda Guryaha Dadweynaha, kuna tilmaaman Dekereetada Lr.172 ee 14.7.1972, ee Wakaaladda iyo JAALLE XASAN CABDULLAHI QAA-LIB, ku heshiiyeen inta hoos ku qoran, kuna saabsan kala gadasho cad dhul ah, oo Ujeeddadiisu tahay Dhismo.-

Sida kor lagu soo sheegay darteed, Jaalle G/le Sare Maxamed Cali Cabdow(Cadani),ahna Ku-simaha Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed Maareeyaheeda Guud, wuxuu ii cad-deeyey in isla Wakaaladdaasu ay ka iibisay Jaalle Xa-san Cabdullahi Qaalib, oo asaguna isla heshiiskaan ku caddeynaya inuu ka gatay kana aqbalay Wakaaladdaas cad-ka dhulka ah, oo Ujeeddadiisu tahay dhismo , lam.56/B, Beddkiisuna yahay 600Mq.oo isku wareegsan, kuna yaal Muqdisho, Degmadda Hodan Xaafadda Guryaha Dadweynaha (Quartiere Case Popolare)- - - - - - - - - - - - - - - - -

Waxaa kaloo ay labada dhinac isla Heshiiskaan iigu cad-

..../.....

Registrato a Mogadiscio il ... al N. ... Vol. ... Esatti So. ... So.

28/1/1977

deynayaa in qaymaha lagu kala gatay Cadkaas dhulka ah, uu yahay lacag ah So.4.200/-(afarkunlabobogol oo shilin) lacagtaas oo dhamaanteed uu gatahu wadaa siiyey Wakaaladdaas.- - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - -

Waxaa markale la caddeyey in Cadkaas dhulka ah, oo kor lagu soo Xusan , ay Soohdimihiisu kala yihiin:- - - -

Waqooyi waxaa ka xiga Dhulka lam.55/B, Koofur waxaa ka xiga Dhul u baanaan Wakaaladda Dhis.Soomaaliyeed, Galbeed waxaa ka xiga Dhulka lam.45/B, Bari waxaa ka Xiga Wadde aan laami ahayn.- - - - - - - - - - - - - - -

Waxaa kaloo labada dhinac ii caddeyney kuna heshiiyeen in shuruudaha la codisioni iyo habka kala gadashada ay tahay noqdaana kuwa hoos ku qoran oo kala ah:- - - - -

1- Iibsadaha (Il COmpratore)

A)-In Heshiiskaan uu ku lahaado dhulkaas uu gatay .- -

B)-Inuu hagaajiyo progetada (Il progetto), ku saabsan dhismaha Guriga laga dhisi doono dhulka la soo sheegay, kuna dhisto Gurigaas mudde ah 6 billaad, oo ka billabata maalinta(muddo) isla Gurigaas Progettadiisu la aqbalo.-

T)-Inuu Waafajiyo Dhismaha Gurigaas Nidaamka(le Norme) sharciga dhismaha(edilizia) iyo Xeerka Caafimaadka.- -

2-In Wakaaladda Dhismaha Soomaliyeed

A)-Inay Ilaaliso ilaalina doonto si dhismaha Gurigaasu u waafaqo Progettada la ansashey (Progetto).- - - - - -

B)-In muddo ah isla 5 sano oo laga billaabo Maalinta la

.../....

Dhamaystiro Guriga Dhismahiisa in aanan la iibsadaha (Il comprateore), dhulka iyo guriga lagu kor dhisayo uusan iibin karin ama wareejin karin, dhammaan amase qaar, Ijaarina karin haddii aysan fasax siin Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed amase u ogolaan.- - - - - - - - -

1)-Gudasho la'aan Shuruudaha ku qoran qaybta "B Waxay keynaysa inuu buro Heshiiskaan iyo inuu Iibsadahu bixiyo Ganaax la mid ah 25% ee Qiimaha kala gadashadaan.- -

2)-Gudasha la'aan Shuruudahaku qoran "T waxay kenaysaa in uu Buro Heshiiskaan amase uu Iibsadahu bixiyo Ganaax la mid ah 25% oo qiimaha kala gadashada Heshiiskaan.-

3)-In iibsadaha uu caddeeyey aqbalayna in haddii uu gudan waayo shuruudaha kor ku tilmaaman qaybta B Uusan xaq u lahayn canshuuraha iyo mid kaleba.- - - - - - - - - -

4)-In uu IIbssadahu haddana ii caddeyey inuu aqbalay dhammaan shuruudaha kor ku qoren qodobyada A, B iyo D oo isla heshiiskaan ah.- - - - - - - - - - - - - - - - -

5)-In dhamman Kharajka ku saabsan Heshiiskaan uu bixin doono Gatahu Jaalle Xasan Cabdullahi Qaalib.- - - - -

1)-

2)-

N. 8714 REB

JAMHUURIYADDA DIIMUQRAADIGA SOOMALIYA

SAXIIX LA SUGAY

Ayadoon marqaati ila joogin aniga oo ah Notaayo Dr.

Muuse Xuseen Sadiiq, ahna Notaayo Muqdisho, waxaan caddeynayaa in Saxiixyada bogga kale ku qorani yihiin kuwii Jaalle G/le SARE MAXAMED CALI CABDOW(Cadani) ku dhashay Carabiya 1924, deggan Xamar, ahna Ku-simaha Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed IYO JAALLE XASAN CABDULLAHI QAALIB, ku dhashay 1940, deggan Xamar ahna Soomaali, Shaqadiisuna tahay Joamatar, oo Heshiiskaan kala saxiixdeen.- - - - - - -

Muqdisho 30 GEN. 1977

N O T A A Y A H A

(Dr.MUUSE XUSEEN SADIIQ )

/XNC.SEBEN

QORAAL MAGUURTO L. 28/1977

KU/XAFIISKA ILAALINTA BUUGGA MAGUURTADDA

L. 39/XI B. G. N.
L. 28/XX B. Q. maguurto
L. 60/XXXVIII ... Q. magu

MUQDISHO

UJEEDDO:-KU QOR BUUGGA MAGUURTADDA

LOO QORE

1

1)-JAALLE XASAN CABDULLAHI QAALIB, ku dhashay Burce 1940, deggan Xamar, ahna Soomaali, Shaqadiisu tahay JEM.- -

LAGA QORE

2)-WAKAALADDA DHISMAHA SOOMAALIYEED, oo u ka jeego KU-simaha Maareeyaha Guud G/LE SARE MAXAMED CALI CADBOW, ku dhashay Carabiya 1924, deggan Xamar, ahna Soomaali.- - - 81

Heshiiska lam.8714 REB ee 30.1.1977, laegu diwaan gelshey Xamar, 31.1.77, Atti Pubblici, Vol.67.LAM.298, ee aan qoray isla aniga Notaayaha ahu, ee Wakaaladdaasi ay kaga iibisay Jaallahaas Dhulka lam.56/B, ee ku yaal Muqdisho Degmadda Hodan, Soohdimihiisuna ku tilmaaman yihiin isla Heshiiskaas, sidaas darteed waxaa la faraya in Jaallaha haya Buugga Maguurtadda uu ku qoro dhulkaas magaca Jaallaha Iibsadey.- - - - - - - - - - - - - - -

Muqdisho 31.1.1977

| | |
|---|---|
| | 6,00 |
| | 1,20 |
| | 2,40 |
| | 2,00 |
| | 11,60 |
| | 31/1/77 |

N O T A A Y A H A

(Dr.MUUSE XUSEEN SADIIQ )

XAFIISKA RAHAMADDA

EE Xamar

Waxaa la Keenay Taariikhda Maanta Wa...ana

lagu oray :

L. 39/XI B. Guud ee Nidaamka

L. 28/XX B. Qoraal maguurtada

L. 50/XXXVIII B. Qoritaanka

Xamar taariikh 31/1/1977

DHOWRAHA RAHAMADAYAALKA

Jaalle [signature]

Jamh D. Somaliyeed

Muq'isho

Dhawrista Rahamm...